

10 Qaab oo loo taageero caadooyinka wax cunidda ee kala duwan ee ilmaha

Dhiirigelin, jawi wanaagsan, iyo korriinka ilmaha ayaa ka caawiya in uu si geesinimo leh u tijaabiyo cuntooyin cusub. Isbeddellada caadooyinka wax cunidda ilmaha ma ahan wax iska dhaca. 10 kan talo ayaa kaa caawin kara ballaarinta cuntada ilmaha.



- 1 Sii cuntooyin leh dhadhan cusub adiga oo aan ka joojineyn cuntooyinkii uu doorbidayey ee uu garanayey.**
Ha qarin cuntada saaran saxanka. U sheeg ilmaha waxa saaran kuna dhiirigeli in uu dhadhamiyo. Mar kasta ku dar wax uu ilmuhu jecel yahay cunto kasta.
- 2 U soo bandhig cunnooyinka qaab ay fududaanayso in la aqoonsadaa.**
Waxaa laga yaabaa in cuntadu ay si fiican u dhadhanto haddii aan cuntooyin kala duwan la isku darin.
- 3 Ku dhiirigeli dhadhaminta adiga oo aan cadaadis ku saareyn.**
Dhadhamintu qasab ma ahan. Ha ku cadaadin wax dambi ahna ha ku saarin ilmaha wax cunidda. Inaad barbardhigto carruurta kale waxa ay yareyn kartaa abateedkiisa. Ammaan xitaa marka uu gaadho guulo yaryar.
- 4 U rid cunto kooban oo aan badneyn.**
Haddii ay suuragal tahay, u ogolow ilmaha in uu isagu rito inta uu doonayo. Waa uu kordhisin karaa haddii uu doono. U riditaanka cunto badan ayaa laga yaabaa inay cabsi galiso ilmaha bilaabitaanka cuntada.
- 5 La cun cuntada ilmaha.**
Cuntadu si fiican ayey u dhadhantaa marka dhammaan qoysku ay isku wax cunayaan. Waa aad ku yareyn kartaa xawaashyada cuntada aad u ridayso ilmaha. Wakhtiyada cuntooyinka ee la wadaago ayaa ka dhiga cunista wakhti farxad leh oo la sugo. Carruurta waxa ay wax ku bartaan daawashada dadka kale.
- 6 Abuur bay'ad cuntada loogu talagalay oo deggan.**
Telefoonada, geemamka, iyo qalabka lagu ciyaaro ma aha in miiska cuntada lala yimaaddo. Ilmaha sii wakhti uu ku dhamaysto ciyaarta ka hor inta uusan cunteynin. Tusaale u noqo — ha qabanin telefoonkaaga ama ha daawanin TV inta aad wax cunayso.
- 7 Ilmaha ka qaybgeli cunto-karinta.**
Ilmaha yari waxa uu dhaqi karaa baradhada, ilmaha ka weynina waxa uu sameyn karaa saladh. Marka uu jarjarayo khudaarta, waa uu dhadhamin karaa sidoo kale. Ku dhiirrigeli kuna ammaan waxkasta oo uu qabanayo.
- 8 Si joogto ah cuntada u sii.**
Cuntooyinka joogtada ahi waa muhiim, xitaa haddii ilmuhu aanu wax badan cunin mar kasta.
- 9 Si wanaagsan uga hadal wax cunidda.**
Ra'yi-celin wanaagsan ka sii waxyaabaha yaryar, sida fadhiisashada miiska. Wax laga diiqadoodo ayaa ay noqon kartaa haddii uusan ilmuhu wax cunin, balse isku day in aad is dejiso. Carruurta waa ay dareemaan haddii waalidku uu walaacsan yahay ama diiqadaysan yahay.
- 10 Qaab aan cadaadis lahayn u maaree wakhtiga wax cunidda.**
Dabeecad wanaagsan oo dabacsan ayaa taageerta badqabka qof kasta. Ha ku sii talaxtegin diiradsaaridda caafimaadka ama ha u kala saarin cuntooyinka mid "wanaagsan" iyo mid "aan wanaagsaneyn." Macmacaanku waxa ay noqon karaan qayb kamid ah cunto isku dheelli tiran. Iska ilaali inaad macmacaanka u adeegsato abaalmarin ahaan.

Qoraalkan waxa la soo saaray iyada oo ay iska kaashanayaan mashruuca Niitty 2 – Ka Wadashaqaynta Badqabka Qoysaska Soogalootiga ah iyo Barnaamijka Neuvokas Perhe ee Ururka Wadnaha ee Finland.